

**Warbixinta Gaarka ah ee Ardayda ee 2023  
Imtaxaanka Sayniska ee Maine**

**Waa maxay warbixintaan?**

Warbixintaan ayaa kuu soo koobayso natiijooyinka dedaalka ardaygaaga uu ka keenay imtaxaanka aqoonta ee gobalka, Imtaxaanka Sayniska ee Maine. Imtaxaanka Sayniska ee Maine waxaa lagu saleeyay Heerarka Sayniska iyo Injineeriyada, tusaale, Heerarka Sayniska ee Jiilka Xiga (NGSS). Imtaxaanka Sayniska ee Maine ayaa looga baahan yahay ardayda dugsiyada dawlada ee Maine ee fasallada 5, 8, iyo sanadka 3aad ee dugsiga sare.

**Waa maxay Imtaxaanka Sayniska ee Maine?**

Imtaxaanka Sayniska ee Maine wuxuu diirada saaraa waxbarashada qaybaha badan oo isku dubarideysa farsamooyinka sayniska iyo injineeriyada iyo fikradaha aasaasiga ah ee anshaxa. NGSS wuxuu qeexayaa farsamooyinka sayniska iyo injineeriyada ee shaqooyinkaas kuwaasoo saynisyahannadu aysan baarin aduunyada dabiiciga ah. Fikradaha aasaasiga ah ee anshaxa ayaa fure u ah fikradaha sayniska waxaana loo kala qaybiyaa sayniska jirka, sayniska nololaha, iyo sayniska dhulka iyo hawada.




Si loo abuuro fahan dheeri ah oo buuxa oo ku aadan waxa ardaygaagu yaqaano uuna samayn karo, xogta lagasoo qaato warbixintaan waa in lala adeegsadaa ilaha kale ee dheeriga ah, sida imtaxaanaadka dugsiga iyo waxbarashada fasalka.

**Su'aalaha aad waydiin karto**




- Maxaad ku barataa fasalka sayniska?
- Waa maxay qaybta aad ugu jeceshahay fasalka sayniska?
- Ma ka fakari kartaa shaqooyin kasta oo adeegsada sayniska oo aad dooneyso inaad samayso marka aad waynaato?

**Su'aalaha aad waydiin karto**







- Muxuu ardaygaygu ku baranayaa fasalka sayniska sanadkaan?
- Sidee ayaan ugu adeegsan karaa xogtaan si aan qaab wanaagsan ugu taageero waxbarashada ardaygayga?
- Waa maxay khayraadka laga heli karo deegaanka si loo taageero barashada sayniska?

# Dedaalka Guud ee Sayniska Ardayda



## Isbar-bardhigada Buundooyinka

Buundada Ardayga:		40
Celceliska Dugsiga:		33
Celceliska SAU:		33
Celceliska Gobalka:		34



Buundada imtaxaanka ardayga ayaa kala-duwanaa karta. Haddii ardaygaagu uu imtaxaankaan galo markale, waxay u badan tahay inuu keeni doono inta u dhexaysa 38 iyo 42 dhibcood.

**Heer aad Uga Hooseeya Filashada Gobalka:** Shaqada Ardayga ayaa Muujinaysa fahanka ugu yar ee fikradaha aasaasiga ah ee sayniska. Jawaabaha ardayga ayaa muujinaaya awooda ugu yar ee xalinta dhibaatooyinka. Sharaxaaduhu waa kuwo ka baxsan qiyaasta maskaxda, aan dhamaystirnayn, ama waxaa ka maqan isku xirka fikradaha guud. Waxaa jira khaladaad badan.


**Ka Hooseeya Filashada Gobalka:** Shaqada ardayga ayaa muujinaysa fahanka aan buuxin ee ku aadan fikradaha guud ee sayniska iyo isku xirnaan la'aan ka dhex jirta fikradaha guud. Jawaabaha ardayga ayaa muujinaaya qaar kamid ah awoodaha si loo qiimeeyo loona xaliyo dhibaatooyinka, laakiin tayada jawaabaha ayaan sugnayn. Sharaxaada fikradaha ayaa noqon karta mid kala dhiman oo aan cadeyn.

**Ku siman Filashooyinka Gobalka:** Shaqada ardayga ayaa muujinaysa fahanka buuxa ee ku aadan fikradaha aasaasiga ah ee sayniska, ayna ku jirto awooda isku xirka fikradaha guud. Jawaabaha ardayga ayaa muujinaaya awooda qiimeynta iyo xalinta dhibaatooyinka joogtada ahiyo u sharxidda fikradaha guud si qeexan oo sax ah si ay u muujiyaan fahanka guud.

**Ka sareeya Filashooyinka Gobalka:** Shaqada ardayga ayaa muujinaysa fahanka qotada dheer ee ku aadan fikradaha aasaasiga ah ee sayniska, ayna ku jirto awooda isku xirrada badan ee fikradaha guud. Jawaabaha ardayga ayaa muujinaaya awooda uruurinta xogta, qiimeynta iyo xalinta dhibaatooyinka kaladuwan, iyo u sharxidda fikradaha guud asagoo adeegsanaaya cadeynta iyo eray bixinta saxda ah si loo taageero loona muujiyo natiijada macquulka ah.

## Buundada guud ayaa ka kooban buundooyinka sadexdaan aag:

### Qaabka iyo Qaybaha Maatarka



Qaybtaan waxay diyaarisaa mawduucyo diirada saaraaya ka caawinta ardayda inay bilaabaan inay fahmaan ilaalinta walaxda iyo qaybaheeda dabiiciga ah.

- Walaxda nooc kasta ayaa loo qaybin karaa qaybo aad u yaryar in la arko.
- Marka labo walxood ama ka badan la isku qaso, walax cusub oo leh sifooyin kale ayaa abuurmay.
- Cabirada sifooyinka kaladuwan ayaa loo adeegsan karaa aqoonsiga waxyaabaha.
- Cadadka (cufka) walaxda ayaa isla sidiisii ahaanaaya marka qaabkeedu isbadelo, xataa kala guurka marka ay u muuqato inay baaba'day.

### Walaxda iyo Tamarta Ilmo-aragtayda iyo Nooleyaasha



Qaybtaan waxay diyaarisaa mawduucyo diirada saaraaya ka caawinta ardayda inay yeeshaan fahan ku aadan qulqulka iyo mareegta walaxda iyo tamarta.

- Mareegyada walaxda ee u dhexeeya hawada iyo ciida iyo geedaha, xoolaha, iyo unugyada ku jira ilmo-aragtayda ayaa noolaada oo dhinta.
- Walaxda waxaa loo qaybshaa faracyo marka ay iskaga kala gudbayso ilmo-aragtayda iyo hawada iyo ciida.
- Geedaha ayaa ka hela nafaqadooda kobaca hawada iyo biyaha cuntada ayaana siisa xayawaannada nafaqada ay u baahan yihiin in jirkoodu kabmo oo kobco.
- Tamarta laga siidaayo cuntada ayaa markii hore ahayd tamar katimid qoraxda taasoo ay uruuriyeen dhirtu ayadoo ah qaab kiimiko ah kaasoo abuuraaya walaxda geedka.

### Nidaamada Dhulka, Nidaamyada Hawada: Nidaamka Xidigaha iyo



Qaybtaan waxay diyaarisaa mawduucyo diirada saaraaya ka caawinta ardayda inay yeeshaan fahan ku aadan Nidaamyada guud ee Dhulka iyo sida ay isku dhex-galaan.

- Nidaamyada waawayn ee Dhulka ayaa isku dhex-gala qaabab badan si ay u saameeyaan agabka dusha Dhulka iyo hanaannada.
- Nidaamyada waawayn ee dhulka waxaa saameeya cufka maadaama awooda cufeed ee Dhulka ee jiidaysa shayga u dhaw dusha dhulka ay sheeyga u jiideyso hoos dhanka dhulka.
- Shaqooyinka aadanaha ee beeraha, warshadaha, iyo nolol maalmeedka ayaa saamayno waawayn ku leh dhulka, dhirta, daadka, badda, iyo hawada.
- Waxaa jira qaybo la arki karo oo ka dhashay maareyaasha Dhulka ee ku wareegaaya qoraxda, dayaxa ku wareegaaya Dhulka, iyo wareegga Dhulka ee cirifada.